



Orientation to Ontario

DUGSIYADA DADWAYNAHA

Dugsiga hoose dhexe waxaa ku jira dugsiga barbaarinta iyo fasallada 1 ilaa 8. Ilmaha ayaa caadiyan waxbarashada bilaaba marka ay jiraan 4 ama 5 sano. Goobaha qaar ayaa leh dugsiga dhexe ee dawlada oo ay dhigtaan fasallada 6 ama 7 iyo sideed. Dugsiga sare (oo sidoo kale loo yaqaano dugsiga sare) waxaa lagu dhigtaa fasallada 9 ilaa 12.

Si aad carruurtaada uga diiwaan geliso dugsiga markii koobaad, waa inaad la xariirtaa golaha dugsigaaga maxaliga ah. Dugsiga ayaa qiimayn doona carruurtaada si loo go'aansho fasalka ay u qalmaan. Waxaa jira taageerooyinka luuqada ee ardayda barta Ingiriisiga.

- Wax ka ogoow dugsiyada dadwaynaha ee ku yaala Ontario adoo booqanaaya wasaarada Waxbarashada oo aad ka helayso ontario.ca
- Akhri tilmaamaha ku aadan waxbarashada dugsiga hoose-dhexe iyo sare adoo booqanaaya settlement.org ama findlink.at/educinfo

GOLEYAASHA DUGSIGA

Gudaha Ontario, waxaa jira 4 nooc oo gudiyada dugsiyada dawlada ah:

- Dugsiyada dadwaynaha ee Ingiriisiga ku baxa
- Dugsiyada Kaatooliga ee Ingiriiska ku baxa
- Dugsiyada dadwaynaha ee Faransiiska ku baxa
- Dugsiyada Kaatooliga ee Faransiiska ku baxa

Si aad u hesho liiska gudiyada iyo maamullada dugsiyada, booqo webseedka Wasaarada Waxbarashada oo ah ontario.ca ama findlink.at/boardlist

DUGSIGA BARBAARINTA EE MAALINTA OO DHAN

Dhammaan dugsiyada dadwaynaha iyo kuwa Kaatooliga ayaa bixiya waxbarashada barbaarinta ee ubadka 4 iyo 5 sano jirada ah oo buuxa (hoose iyo sare). Dugsiyada qaar ayaa bixiya barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib ee ardayda dugsiga barbaarinta.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Wasaarada Waxbarashada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/full-dayK

WAXBARASHADA LUUQADA FARANSIISKA

Waxbarashada luuqada Faransiiska ayay siiyaan 12 kamid ah goleyaasha dugsiyadu carruurta waalidiintoodu ku hadlaan afka Faransiiska. Xog badan ka ogoow dugsiyada Faransiiska oo aad ka helayso Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca ama findlink.at/FSL

WAXBARASHADA LUUQADA FARANSIISKA

Waxaa jira saddex nooc oo casharada Faransiiska ah oo lagu barto dugsiyada dadwaynaha iyo kuwa Kaatooliga ee ku baxa Ingiriisiga. La xariira gudiga dugsiga ee deegaankaaga si aad u hesho barnaamijyada ay heli karaan ardayda deegaankaaga.

- Faransiiska Aasaasiga ah - ardayda ayaa u barta afka Faransiiska maado ahaan.
- Faransiiska la kordhiyay - ardayda ayaa u barta Faransiiska maado ahaan Faransiiska ayaana ah luuqada casharada ee ugu yaraan

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

hal maado oo kale.

Waxbarashada Faransiiska ah – ardayda ayaa u barta Faransiiska maado ahaan Faransiiska ayaana ah luuqada casharada ee ugu yaraan labo maado oo kale ama ka badan.

Xog badan ka ogoow barnaamijyada FSL oo aad ka helayso Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca ama findlink.at/onfs

WAXBARASHADA BAAHIYAHA GAARKA AH

Barnaamijyada ayay heli karaan carruurta qaba baahiyaha habdhaqanka, hadalka, garaadka ama jirka si ay qaab buuxa uga faa'iidaystaan khibradahooda dugsiga. Dugsiyada ayaa sidoo kale taageero siiya ardayda qaba naafooyinka waxbarashada.

Xog badan ka ogoow barnaamijyadaan oo aad ka helayso Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca ama findlink.at/Spec/Edu



OGEYSIIS MUHIIM AH

Ilmuhu lacag la'aan ayay ku dhigtaan dugsiyada dawlada.

Dhammaan carruurta da'aha u dhexeeya lix iyo 18 sano waa inay aadaan dugsiga.



MA OTAHAY?

Faransiiska sida barashada luqadda labaad waxaa la siiyaa dhammaan dadweynaha Ingiriisida iyo ardayda Katooliga.

